

Miyaad qaadataa Newstart Allowance (Gunnada Shaqo-Doonka) oo aad shaqaysaa?



We speak your language ☎ 13 1202

Are you receiving Newstart Allowance and working? - Somali

Si loo xisaabiyo inta ay noqonayso Newstart Allowance (Gunnada Shaqo-Doonka) oo aan ku siin karno, waxaan doonaynaa inaan ogaano marka ay xaalladdaadu isbadasho.

Ogsoonow inaad:

- Noo sheegto haddii adigaama wadaygaagaaad shaqo bilowdaan
- Noo sheegto dakhligaaga maalin kasta oo aad shaqayso labadaas toddobaad ee ku qoran foomkaaga, xataa haddaan lacag lagu siin
- Noo sheegto saacadaha aad shaqaysay
- Noo sheegto dakhligaaga **duuduubka** ah. Taas oo ah xaddiga ka hor intaan canshuurta iyo waxyaalaha kaleba laga jarin
- Si degdeg ah nooga soo wac **13 1202**, haddii aad xarayso foomkaaga 4, 6, 8, 10 ama 12 toddobaad oo aad heshay wax dakhli ah
- Weydii loo-shaqeeyahaaga qiyaasta saacaddii mushaarkaaga oo ay ku jirto wax kasta oo ganaax ama qiyaasta gunnada dheeraadka ah iyo wax kasta oo gunnooyin kale ah
- Ku soo xir payslips-kaaga foomka laba toddobaadlaha ah

- Noo sheeg dakhligaaga loo-shaqeeye kasta, haddii adiga ama wadaygaagu aad u shaqaysaan wax ka badan hal loo-shaqeeye
 - Ka codso Casual Income Record (Diiwaanka Dakhliga Mar-Dhaca ah) xafiiska Centrelink. Wuxuu kugu caawin karaa inaad diiwaangaliso dakhligaaga
- Na waydiiso inaan kaa baddalno taariikhda aad noo keento foomkaaga si ay ugu aaddo maalinta lacag-bixinta loo-shaqeeyahaaga.

Haddii adiga ama wadaygaaga aadan noo soo sheegin wixii is-baddal ah ee loo baahnaa, waxay keeni kartaa in:

- lacagtaada la joojiyo ama dib loo dhigo, **iyo/ama**
- in lacagtii dheeraadka ahayd in lagaaga baahdo inaad dib u bixiso, **iyo/ama**
- ujradda soo-celinta oo dheeraad ah, mararka qaarkood.

Haddii aad dhowrayso baarista nashaadka sida adoo shaqeeya ayna saacadihii shaqadaaduna ay hoos uga dhacaan 30 saacadood labadii toddobaad waa inaad si degdeg ah ugu sheegtaa Centrelink inay la socdaan sidaas.

Si aad luqadda Soomaaliga ugula hadasho Centrelink waxaad wacdaa **13 1202***.

Macluumaadka ku qoran luqadda Soomaaliga waxaa kaloo laga heli karaa bogga website-ka **www.centrelink.gov.au**

* Wicitaannada lambarrada ka bilawda "13" oo laga soo waco adeegga taleefoonka caadiga ah waxaa laga soo wici karaa meel kasta oo Australia dhexdeeda ah qiimuhuna wuxuu la mid yahay wicitaanka degaanka (qiimaha wicitaannada way is-badeli karaan ayadoo hadba ku xiran adeeg-bixiyaha taleefoonka laga soo wacay). Wicitaannada lambarrada ka bilawda "1800" waa lacag la'aan. Wicitaannada loo adeegsado taleefoonka dad-weynaha ee lacagta lagu dirsado ama moobaylka waxaa lagu dallaci karaa qiima sare.

www.centrelink.gov.au



Australian Government



MCLW025SOM.0608 (page 1 of 1)